TENANTSRIGHTS

SOMALI

SOOMAALI

XUQUUQDA KIREYSTAYAASHA

Qof kasta oo degan Fiktooriya wuxuu leeyahay xuquuq sharci. Xuquuqdaas waxaa ballan qaaday Xeerka Kireysiga ee Deganayaasha ee 1997. Sharci darro ayey ku tahay kuwa guryaha laga kireysanayo inay ka hor istaagaan ama ciqaabaan kireystayaasha inay u doodaan xuquuqdooda.

Mabaadiida asaasiga ah iyo talaabooyinka Xeerka Kireysiga ee Deganayaasha waxaa lagu muujiyey Buuggaan, kaas oo ka jawaabaya suaalaha kireysiga ee badanaa la is weydiiyo. Haddii aadan ka hellin jawaaabta aad u baahan tahay buuggaan, ama u baahan tahay macluumaad ama kaalmo intaas ka badan la xiriir Talasiinta kireystaha. Waxaa jira adeegyo talada bixiya meel kasta oo fiktooriya ka mid ah. Kuwani waa lacag la'aan waana adeegyo qarsoodi ah kana caawimaya kireystayaasha inay xaqooda raadsadaan. Ururka Kireystaayshu waa ka mid ah kuwaas. Waxaad naga wici kartaa Tel: 9416 2577 ama naga eeg meesha macluumaadkayagu ku jiro: www.tuv.org.au halkaas oo aad ka hellayso adeega talasiinta ee kuugu dhow. Haddii aad u baahan tahay mutarjum naga wac Adeega ku Tarjumida Afka Tel: 131 450.

Ururka Kireysigu waxay siiyaan adeegyo badan kireystayaasha. Ururka Kireystayaashu waxay awoodaan

- inay kaa caawimaan inaad buuxiso foomka ama heshiisyada la xiriira kireysigaaga
- waxay kaa caawimi karaan dhibaatooyinka gaarka ah, sida dayactirka ama kordhinta kirada
- waxay la xaajoon karaan ama iyagoo ku matalaya la hadli karaan cida aad guriga ka degan tahay ama wakiilka guryaha la ijaaro.
- kaa caawimaan ama wakiil kaaga noqodaan Maxkamadda Maamuleedka Dadweynaha Fiktooriya
- La hadlida kooxda Jaalliyadaada arrimaha xuquuqda kireysiga
- in laguu xawilo ama wareejiyo adeega talasiinta kireystaha

Ururka Kireystayaashu waxay xil iska saarayaan siinta macluumaadka iyo xogsiinta kireystayaasha ku hadla af aan Ingiriiska ka ahayn.

WAXA LA RABO INUU OGAADO KIREYSTAHA CUSUBI

Qodobadaan soo socda oo dhami waxay khuseeyaan kireystayaasha badankood.

- cida guriga leh ama wakiilada guryaha la ijaarto kuguma handidi karaan inaad saxiixdo foomam ama heshiisyo aadan akhriyi karin ama fahmayn (Ururka Kireystayaasha ama adeega talasiinta guryaha ee xaafadaada ayaa kuu sharxi kara foomka ama heshiiska)
- haddii aad heshiis la gasho cida aad guriga ka ijaaratay ama wakiilada guryaha ijaara, xaqiiji inay qoran tahay ayna saxiixeen adiga ama cida ama wakiilka guriga ijaara (heshiiska afka ah looma qadariyu inuu yahay wax sharci ah sida ay ka yihiin wadamada qaarkood)
- Haddii aad lacag siisay cida aad giuriga ka ijaartay ama wakiilka guryaha la ijaarto, weydiiso inay ku siiyaan warqad ay saxiixan oo taariikhdu ku qoran tahay khaasatan haddii aad bixisay lacag cadaana.
- Ku xafid meel aamin ah warqada lacag bixinta, dukumintiga, foomamka ama heshiiska la xiriira kireysigaaga ilaa aad guriga ka guuraysid
- haddii khilaaf yimaado Adeegyada talasiinta kireystaha ama Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya ayaa caawimi kara inaad kala xaajooto xal u helida dhibaatada kireysigaaga
- dalab u qoro xafiiska Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya haddii aadan dhamayn karin khilaafka adiga iyo cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto. Maxkamadani ma aha maxkamadaha waaweyn. Lacag kaa qaadi mayso haddii aad ku guul daraysato dalabka dacwadaada. Waa mid lagu qaado jawi caadi ah xalna loogu raadiyo qaab aan lacag badan baxayn, kireystayaashuna waa inay ka faaiideystan haddii masuuliyiintaasi ku amraan in wakiilada guryaha la ijaarto in xuquuqdooda la dhowro.

TENANTS UNION
of Victoria Ltd

BILAABIDA KIREYSIGA

DALABKA KIREYSIGA GURIGA

Markaad dalbato guri ijaara, Cida gurigaaga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto ayaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan macluumaad qof ahaaneed. waa sharci daro inay ku weydiiyaan

- Jinsiyaadada
- Siyaasiyan waxaad aaminsan tahay
- Diintaada
- Xaalkaaga Guurka
- Caafimaadka
- Jinsigaaga
- Nooca rabitaanka galmada

Kuwani shaqa kuma leh in aad ku haboon tahay in guri lagu siiyo iyo in kale. Haddii aadan doonayn inaad ka jawaabto su'aalahaan ha ka jawaabin. Haddii dalabkaaga aan la aqbalin aadna aaminsan tahay sababta laguguu diiday inay tahay diidmada aad diiday in aad ka jawaabto su'aalahan midood, tala weydiiso Ururka kireystayaasha.

Xaaladaha qaarkood waa sharci daro in cida guriga leh ama wakiilka guryaha ijaara diidaan dalabkaaga carruur aad leedahay darteed. Haddii dalabkaaga la diido sababtoo ah carruur baad leedahay, la xiriir Ururka Kireystayaasha la tashi darteed.

IJAAR

Dalabkaaga haddii la ogolaado, waxaa lala geliyaa heshiis ijaarasho. Ijaarashada badankeed waa heshiis qoran, in kastoo badankeed yahay heshiis afka ah. Waxaa jira laba nooc oo ijraasho: Waqti go'an iyo mid waqti waqti ah.

Midka waqtiga go'an ahi wuxuu kuu ogolaadaa inaad ijaarato guriga mudda go'an, badanaa 12 bilood. ijaarashada waqti waqtiga ah waxa weeye mid ku dhamaataa badanaa bil bil. Dhamaadka heshiiska waqtiga go'an, heshiiskaagu wuxuu noqonayaa mid waqti waqti ah, haddii aadan saxiixin heshiis ah mid waqti go'an ah. Ma aha inaad dhamaadka heshiiska ijaarashada baxdo, haddii aadan adigu rabin ama aadan hellin ogeysiis ah inaad guriga ka baxdo (arag ogeysiisyada ka bixida).

Heshiis qoran oo ah kan mudada go'ani wuxuu ku siinayaa difaac adag haddii khilaaf yimaado, inkastoo weli ay ku caawimayaan RTA haddii ijraashadaadu tahay mida waqtiwaqtiga ah.

Haddii aad la qaybsato guriga qof, xaqiiji in magacooda lagu daro heshiiska. Haddii aad ka baxdo saaxiibkaase ku haro, weydii cida guriga leh ama wakiilka guryaha ijaara inay ka tiraan magacaaga heshiiska. Haddii aadan samayn, waxaad masuul ka noqon kartaa lacag kasta oo aan la bixin ama daawac kasta oo gaara guriga kaas oo uu u geystey saaxiibkaa markaad ka baxday ka dib.

IJAAR IYO CURAAR

Bilawga kireysigaaga cida aad guriga ka degayso ama wakiilka guryaha la ijaarto ayaa ku weydiin doonaa inaad qadinto bisha u horaysa lacagteeda. xaaladaha qaarkood laguma weydiin doono wax ka badan ijaarka bisha u horaysa.

Waxaa kaloo lagu weydiin doonaa inaad bixiso lacag curaar ah si loogu haysto haddii aad lacagta bixin weydo ama guriga khasaaro gaarsiiso. Xaalladaha badankood, curaartaasi kama badnaan karto bil ijaarkeed.

Waa in ay ku siiyaan foomka xeraynta curaarta guriga cida guriga lehi ama wakiilka guryaha la ijaarto. Markaad foomkaas buuxiso soona saxiixdo foomka, ku soo celi cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto. Dabadeed waxay ku siin doonaan koobiga muujinaya inaad bixisay lacagta curaarta dabadeedna u dir Maamulka Curaarta Kireysiga Guryaha la dego. Maamulkaas ayaa kuu soo diri doona warqad lacagbixineed 14 berri gudahood.

Xafiiska Gurisiinta ayaa laga yaabaa inuu kaa caawimo haddii aadan awoodin curaar bixinta aadna tahay qof haysta Deganaansho aad joogto u joogi karto Australia.

Weydii Deynta Curaarta Xafiiska Gurisiinta ee meelaha aad degan tahay (ka eeg White Pages-ka tusaha telefoonka A-B waxayna ku hoos qoran tahay Human Services-ka).

Haddii aad ka baxdo gurigii aad deganayd aadna ku wareejiso kireysigaaga kireyste kale, waa inaad buuxisaa foomka wareejinta curaarta (kaas oo laga helli karo cida guriga leh ama wakiilka guryaha ijaara ama Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya).

WARBIXINTA XAALLADA GURIG

Inta aan ijaarashadaadu bilaabmin cida guriga leh ama wakiilka guryaha ijaara ayaa eegi doona guriga aad ijaaratey. Waxay buuxin doonaan warbixin ku saabsan xaallada guriga oo sheegaysa xaallada guriga waxayna ku siin doonaan laba koobi oo ah warbixintii ay soo buuxiyeen.

Waa muhiim inaad xusto wax kasta oo aad ku diidan tahay warbixinta ay ka soo qoreen guriga. Wax kasta oo jaban ama wasakh ah waa xusi kartaa, ama waxaa lagugu eedayn karaa wixii ka xun marka aad ka guurayso. Marka aad buuxiso aadna saxiixdo warbixinta, ku soo celi cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto xafidna koobi ka mid ah waxaad ka qortay.

DUKUMINTIYADA KALE IYO MACLUUMAADKA

Cida gurigaaga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto ayaa ku siin doona tafaasiisha qolada lala xiriirayo haddii loo baahdo dayactir degdeg ah. Waana inay ku siiyaan Qoraal sheegaya Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, kaas oo sharxaya xuquuqda iyo masuuliyaadka cida guriga leh iyo kireystayaasha.

XIRITAANKA QALABKA GURIGA LOO ADEEGSADO

Inta aadan Guriga u guurin, xiro korontada, gaaska, biyaha iyo telefoonka adoo magacaaga ku soo qoraaya haddii kale waxaa laga yaabaa in lagugu soo dalaco inaad bixiso kharajkii qoladii kaa horeysey. Cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waxay ku siin karaan tafaasiisha shirkadaha qaabilsan hawshaan oo agagaaraha degan.

Waxaa lagugu soo dalici doonaa kharajka xiritaanka Korontada iyo telefoonka.

MUDADA AAD EGAN TAHAY GURIGA

Dayactirid

Cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waa inay xaqiijiyaan in halka aad degaysaa ay ahaato nadiif ayna maran tahay marka aad bilaabayso degitaankaaga. Waxaa kaloo waajib ku ah inay dayactiraan mudada aad degan tahay oo kiretsigaagu socdo oo dhan.

Dayactirid degdeg ah

La xiriir cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto haddii aad u baahan tahay dayactir degdeg ah. xaalladaha soo socda ayaa loo qadarin karaa degdeg

- Adeega biyaha oo iska furma/dilaaca
- Musqusha oo dilaacda ama xiranta
- Saqafka kore oo si xoog leh biya u soo deynaya
- Gaaska oo meel ka sii daynaya
- Cilad koronto oo khatara
- Daad
- Daadad ama khasaaro dab
- Biyaha kulul, biyaha caadiga ah kan wax lagu kariyo kan guriga kululeeya amaadeegsiga lafandaayada oo istaaga
- Gaaska, Korontada ama biyaha oo aan socon
- Cilad gasha qalabka biyaha ee cida guriga lihi gelisey kaas oo keenaya in biya aad u badani khasaarayaan

- Cilad ama khasaare ka dhigayaa guriga mid aan aamin ahayn
- Cilad aad u weyn oo ku jirta wiishka ama jaranjarada

Haddii cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto aan lala xiriiri karin ama ay diidaan inay wax ka qabtaan waxaad awood u leedahay inaad

- Adiga naftigaagu dayactirto ilaa qiima gaaraya $1000 aadna codsato in lacagtaa laguu celiyo (waa inaad xafidaa warqadaha lacag bixinta), ama
- Waa inaad ka dalbataa Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya si ay ugu amraan cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto inuu wax ka qabto dhibta

Dayactirka aan degdega ahayn

Haddii dhibaatadu aanay degdeg ahayn waxaa jira saddex tallaabo oo la raacayo.

1. u soo dir cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto Ogeysiinta Guriga cida leh (kani waa foom Ururka Kireystayaasha ama Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya). Tani waxay ku siinaysaa 14 berri gudahood in wax looga qabto dhibaatada.
2. Haddii aan dhibaatada wax looga qaban 14 berri gudahood u soo qor Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya weydiina inay baaraan iyagu. Ku soo hagaaji dacwadaada

   Director
   Consumer Affairs Victoria
   GPO Box 123A
   Melbourne
   Vic 3001
3. Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya baare ka socda ayaa booqan doona gurigaaga dhibaatadana ka soo qori doona warbixin. waxay kuu soo diri doonaan koobiga warbixintooda. Haddii laguu sheego in loo baahan yahay dayactir, ka dalbo Maxkamd maamuleedka shicibka Fiktooriya inay ku amarto cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto inay wax ka qabtaan dhibta.

Kharajka ka yimaada tahsiilaadka

Waa inaad bixisaa korontada, gaaska iyo biyaha haddii meterkaaga keli ahaan la xisaabiyo. Cida guriga lihi waa inay bixiyaan haddii aan si gaara loo xisaabin kharajyada kor lagu xusay. Haddii si gaara ama keli ahaan loo xisaabiyo mitirkaaga waa in tas-hiilaad bixiyayaasha kuu sheegaan.

Kireystayaasha ayaa badanaa masuul ka ah bixinta telefoonka.

Xoriyadaada

Cida guriga leh ama wakiilka guryaha laga ijaartaa waxay ku soo geli karaan guriga kuu ijaaran sababo muciyana, sida dayactirid muhiima. Waxaa waajib ku ah inay kuu soo qoraan ogeysiis qoran kaas oo sheegaya sababta ay u doonayaan inay soo galaan gurigaaga.

Cida guriga leh ama wakiilka guryaha laga ijaarto waa inay kaa hellan ogolaansho ay ku soo galaan guriga, ama waa inay ku siiyaan 24 saacadood ogeysiis qoran oo sheegaya sababta ay u doonayaan inay u soo galaan. Haddii ogeysiiska boostada la soo dhigay waa inay ku siiyaan laba berri. Waxay gurigaaga soo geli karaan 8:00 subaxii ilaa 6:00 galabtii marka laga saaro xilliyada fasaxa lagu jiro.

Waxaad dalab u qoran kartaa Maxkamd Maamuleedka Shicibka Fiktooriya inay u soo qoraan amar ay kaaga joojinayaan haddii ay si joogta u soo galaan ama ku handadaan.

LACAGTA KUGU BAAQATA

Cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waa kaa saari karaan haddii aad la daahsan tahay lacagta 14 berri. Kuma saari karaan iyagoo aan amar ka hellin Maxkamd Maamuleedka Shicibka Fiktooriya. Xataa, markaas ka dib booliiska keliya ayaa ku saari kara.

IJAAR KORDHINTA

Cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waxaa waajib ku ah inay ku siiyaan 60 berri oo ogeysiis qoran ah haddii wax lacag ah la kordhinayo.

Haddii aad u malanayso in lacagta la kordhiyey aanay xaq ahayn u qor warqad Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya. Waxaa waajib kugu ah inaad u qorto Xafiiska Habsami Wax u gadashada iyo Arrimaha Ganacsiga 30 berri gudahood marka aad hesho ogeysiiska lacag kordhinta.

Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya qof ka socda ayaa iman doona guriga waxna ka qori doona kordhintaas.

Haddii warbixintaas kordhinta lagu ogolaado ay tahay mid aan xaq ahayn, waxaad ka dalbanaysaa Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya inay joojiyaan kordhintaas laga hadlay.

Bixi ijaarka la kordhiyey ilaa Maxkamad Maamuleedku ay bixiso amarka haddii kale ijaarka ayaad dib uga dhacaysaa.

JOOJINTA KIREYSIGA
Ogeysiinta ka bixida guriga

Cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waxaa waajiba ku ah in ay ku siiyaan ogeysiiska guri ka bixida haddii iyagu ay rabaan inaad ka baxdo. Mudada lagu siinayaa waxay ku xiran tahay sababta guriga lagaaga saarayo. La xiriir Ururka Kireystayaasha haddii aad hesho ogeysiiska ka bixida aadanse doonayn inaad ka baxdo amase aad u baahan tahay waqti. Xasuusnow, kumana saari karaan iyagoo aan ka haysan amar Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya.

Ogeysiisnta ka bixida guriga

Waxaa waajib kugu ah inaad siiso Cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto ogeysiin qoran oo ah inaad ka baxayso. Mudada aad siinayso ogeysiiska waxay ku xiran tahay xaalladaada.

Xaalladaha badankood waxaa la bixiyaa 28 berri oo ogeysiis ah haddii heshiiskaaga kireysigu yahay waqtiwaqti ama aad doonayso inaad ka baxdo maalinta ugu dambaysa heshiiska kireysiga ee go'an. Haddii ijaarashadaadu ay tahay mida mudada waqtiwaqtiga ah aadna u baahan tahay in aad dhaqso u guurto la xiriir Ururka Kireystayaasha talo ahaan.

Haddii aad rabto inaad ka baxdo inta aanu dhamaan heshiiska mudada go'an ahi, ogeysiiska looga baahan yahay waxay ku xiran tahay xaalladaada. Xaalladaha badankood, haddii aad ka baxayso inta aanu dhamaan ijaarka mudada go'ani, cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waxay ku weydiin karaan inaad bixiso kharajka lagu lagu sheegayo in gurigu banaan yahay, kharajka dib u jaarida, iyo ijaarka inta laga hellayo dad guriga ijaarta. La xiriir Ururka Kireystayaasha talo ahaan.

Soo Ceshiga Curaarta & codsashada Tixraac

Markuu dhamaado kireysigu cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto ayaa eegaya guriga la ijaartay. Waxay samayn karaan ashtako ka soo horjeeda curaartaada haddii ay malaynayaan inaad khasaaro u geysatey guriga kuu ijaarnaa, aadna kaga tagto iyadoo aan la nadiifin, ama weli ijaar lagu leeyahay.

Haddii aad ogolaato waxay sheeganayaan, waxay ku siin doonaan foomka Codsiga Curaarta. Haddii aad ku qanacsan tahay tafaasiisha foomka, saxiix kuna soo celi cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto. Ha saxiixin haddii aadan ku raacsanayn waxa cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto sheeganayo.

Haddii aad saxiixday foomka, cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waxay u diri doonaan Maamulka Curaarta Kireysiga guryaha la ijaarto. Maamulku waxay idin ka bixin doonaan adiga iyo cida guriga lehba inta lagu heshiiyey foomka.

Haddii aad diido codsigooda, waxaa waajib ku ah inay ka dalbadaan Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya in curaartaada qaar ama kulligeed lagu wareejiyo. Maxkamada marka la joogo waxaa lagu siin doonaa fursad ah inaad diidi karto waxa cida guriga lihi ay sheeganayaan.

Waa fikrad fiican dhamaadka kireysiga inaad weydiiso cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto inay ku siiyaan warqad ay ku sheegayaan sida aad ula dhaqantay. Weydii inay warqada ku sheegaan inaad si joogta ah lacagta ku bixin jirtey waqtigeedana aadan dhaafi jirin aadna ilaalisay guriga nadaafadiisa khasaarana u geysan.

MAGDHOW

Waxaad u sheegan kartaa magdhow cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto haddii ay kugu dhacdo khasaare sbabtoo ah iyagaan ka soo bixin masuuliyaadkoodii sharciga ahaa. Masalan, waxaad soo jeedsan kartaa dacwo haddii qalabkaaga guriga biyo wax yeellaan ka dib markii cida guriga lihi kaa sameyn waayeen biya kor ka soo daadanaya.

Dacwada magdhowga waxaa la samayn karaa ka hor, ama inta lagu jiro ama ka dib kireysiga.

Si aad u samayso dacwo waxaa waajib ah inaad u soo dirto cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto Ogeysiiska Jebinta Waajibaadka (waxaa laga helli karaa Ururka Kireytayaasha ama Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya). Ogeysiiskani wuxuu tafaasiil ka bixinayaa khasaaradii ku gaaratey. Haddii aanay 14 berri gudahood magdhow ku siin waxaad ka dalban kartaa Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya si ay u bixiyaan amarka bixinta magdhowda.

Cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto waxay iyaguna magdhow kuu sheegan karaan haddii aad ka soo bixi weydo sharciyan masuuliyaadka lagaa rabo. Masalan, Haddii aad guriga ka baxdo iyadoo deyn lagugu leeyahay. Waxayna raacayaan talaabooyinkaad qaaday oo kale.

Maxkamdu ma qaadi karto dacwad magdhow oo ah xannuun iyo rafaad, dhaawac jireed ama dhimasho, mana qaadi karto dacwad la xiriirta lacag gaaraysa $10,000 marka laga reebo xaallada gaara.

La xiriir Ururka Kireystayaasha haddii aad rabto inaad samayso dacwo magdhow ah ama aad hesho Ogeysiiska Jebinta Waajibaadka oo ka socota cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto.

Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya.

Maxkamad Maamuleedka Shicibka Fiktooriya waxay xalisaa khilaafyada Cida guriga leh iyo kireystayaasha. Dalabka Maxkamadu wuxuu kugu kalifayaa lacag dhan $30. Haddii lacagta ku soo gashaa hoosayso, Waxaa laga yaabaa in maxkamadu kaa dhaafto lacagtaas.

Meesha lagala xiriirayo Maxkamada waa:

55 King Street
Melbourne
Tel: 9628 9800, Telefoonka meel walba lagaga soo wici karo lacag is le'eg
(toll free) 1800 133 055, Fax 9628 9822

Haddii aad dalab u qorato Maxkamada, Waxaa waajib kugu ah inaad u dirto koobiga dalabka cida guriga leh muda toddoba berri gudahood ah. Maxkamadu waxay kuu sheegaysaa waqtiga iyo meesha lagu qaadayo maxkamdaada. Haddii dhibaatadaadu ay tahay degdeg, u sheeg maxkamada marka aad dalabka qadimayso.

U sheeg maxkamada inta aan waqtiga dhegaysiga la gaarin haddii aad u baahan tahay mutarjum. midani waa waa adeeg lacag la'aana.

Ururka Kireystayaashu waxay kaa caawimi karaan inaad u diyaar garawdo maxkamada. Xaalladaha qaarkood waxaanu kuu tegi karnaa maxkamada waqtiga ay dhacayso. Midanina waa adeeg lacag la'aana.

Dacwooyin lid ku ah cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto

Waxaad ku xerayn ashtako Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya haddii cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto ay u dhaqmeen si sharci daro ah ama shaqada waafaqsanayn. Haddii Xafiiska Macmiilaha ee Fiktooriya ay ogaadan in cida guriga leh ama wakiilka guryaha la ijaarto ay u dhaqmeen si khilaafsan sharciga waxaa ciqaabi doonta maxkamada.